

Codso si aad u hesho dheefaha Fresh Bucks ee sanadka 2022!

Codsiga bakhtiyaanasiibka dadweynaha wuxuu furmayaa Oktoobar 11, 2021.

Laga bilaabo Oktoobar 11 illaa Oktoobar 29, codso inaad hesho dheefaha Fresh Bucks ee sanadka 2022.

Qof kastaa waa inuu codsadaa dheefaha sanadka 2022, xitaa haddii codsaduhu yahay macmiilka Fresh Bucks ee hadda jira. Codsadayaashu waxay ku soo gudbin karaan codsiyada onlayn ama taleefan faahfaahintaasna waxaa laga heli doonaa SeattleFreshBucks.org marka la gaaro Oktoobar 1. Macluumaadka soo socda ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo u qalmitaanka:

Tirada qoyska.

"Qoyska" waxaa loola jeedaa dhammaan dadka la nool codsadaha lana wadaaga kharashaadka. Haddii cabbirka qoyska codsaduhu si joogto ah isu beddelo, fadlan sheeg cabbirka qoyska ee joogtada ah.

Wadarta dakhliga qoyska, cashuurta ka hor, 12kii bilood ee la soo dhaafay.

Cinwaanka guriga ee hadda. Macluumaadkan wuxuu u baahan yahay in si sax ah loo geliyo ama waxay saamayn ku yeelan kartaa soo gudbinta codsiga. Haddii codsaduhu uusan lahayn cinwaan guri, fadlan geli cinwaanka boostada.

Dhammaan codsiyada u qalma, oo aan laba mar soo laabanin ee lagu helo muddada codsiga bakhtiyaanasiibka dadweynaha waxaa la gelin doonaa bakhtiyaanasiibka dadweynaha. Fursadaha codsadaha ee ah in lagu doorto bakhtiyaanasiibka waa isku mid, haddii ay ku codsanayaan onlayn ama taleefan.

Fresh Bucks waxay iskaashi la samaysaa ururada bulshada ku salaysan iyo rugaha caafimaadka si loo qoro dadka u qalma si ay u helaan dheefaha Fresh Bucks. Haddii codsaduhu codsi u gudbiyay urur aan iskaashi la leenahay, uma baahna inay soo gudbiyaan arjiga Bakhtiyaanasiibka Dadweynaha.

Su'aalo? Booqo SeattleFreshBucks.org or call 206-684-2489.



Seattle
Office of Sustainability
& Environment

Fresh Bucks waxaa maal gelisa Magaadada Seattle
Cashuurteeda Sharaabka Macaan oo waxaa maamula
Xafiiska Seattle ee Xasiloona & Deegaanka.

Somali